

## MACLUUMAADKAAGA

Macluumaadka aad ilaa iminka na siisay waxaa loo diiwaangelin doonaa si hawlaha loola socon karo.

Haddii aad rabto in aannu tallaabo qaadno, fadlan noo sheeg macluumaadkaaga xiriirka

Magacaaga

Cinwaankaaga

Summada  
boostada

Lambarka telefoonka

Emailka

Fadlan noo sheeg sida aad rabto in aannu kuula soo xiriirno matalan saacad gaar ah ama meel gaar ah.

**Qofka hay'adda aad kala xiriirto si aad gargaar iyo taageero uga hesho**

Miyaad oggoshahay in macluumaadkaas loo gudbiyo iskaashiga hay'adda ee xaafaddaada?

Macluumaadka dhacdada  Haa  Maya oo keliya

Macluumaadkayga  Haa  Maya

## MAXAY U HABBOON TAHAY IN AAN KA SOO WARBIYO DEMBIGA NECEYBKA?

Waxay Booliisku rabaan in ay yareeyaan dembiyada neceybka ku salaysan. Waxaad Booliiska ka caawin doontaa in ay 'Sawir Dhab ah' ka sameeyaan dembiyada neceybka ku salaysan ee ka jira bulshadaada waxaanad gacan ka bixin kartaa in laga hortago in ay taasi ku dhacdo qof kale.

Waxay Booliisku tallaabo ka qaadi karaan dembiileyaasha haddii ay ka war helaan uun dembiyada neceybka ku salaysan

Qofna xaq uma leh in uu dembi kuu geysto si kastoo ay tahay xaaladdaada sharciyeed

Waxaannu rabnaa in aad nabad dareento oo aad dareento in lagu maqlayo waxaan idin ilaalin karnaa adiga iyo dadka kale

## SIDEEN UGA SOO WARBIYAA DEMBIYADA NECEYBKA?

Waxaad dembiyada neceybka ku salaysan ka soo warbixin kartaa dhibbane ahaan, markaati ahaan ama adigoo ku hadlaya magaca qof kale

Ma jirto dhacdo aad u yar oo u baahnayn in laga soo warbixiyo

Sida ugu fiican ee aad Booliiska ugu soo sheegi karto waa adigoo toos ula xiriira laakiin waxaad weliba isticmaali kartaa foomkan iskaa uga warbixin, internetka halkan [www.report-it.org.uk](http://www.report-it.org.uk) ama adigoo adeegga CrimeStoppers (Dembi Joojiyayaasha) ka wacaya telefoonka bilaashka ah 0800 555 111

## MAXAA DHICI DOONA MARKA AAN KA SOO WARBIYO?

Waxaannu eegi doonaa warbixinta aad soo dirto waxaan kuugu deeqi doonaa talobixin iyo taageero

Waxaad noo sheegi kartaa gargaarka aad u baahan tahay iyo haddii aad rabto in aannu arrinka soo dhexgalinno dad kale

Waxay Booliisku qaadi doonaan tallaabooyin ay kugu ilaalinayaan waxayna kuu sheegi doonaan waxa dhici doona

**Marka aad soo buuxiso, fadlan foomkan u soo celi saldhigga booliiska ee xaafaddaada.**

**Waxaad weliba buugyarahan u geyn kartaa ururka soo socda:**

Fix local contact details here

## WAA MAXAY DEMBIGA NECEYBKU?

Dembi kastoo dhibbanaha ama qof kale uu u arko in uu ku salaysan cadaawonimo la xiriirta cidda ay yihiin ama sida ay noloshooda u wataan

Dembiyada neceybka ku salaysan waxaa ka mid noqon kara waxyeellayn, weerar, xadgudub iyo kadeedis

Booliisku waxay diiwaangeliyaan dembiyada neceybka ku salaysan dhammaantood marka lagu dulmiyo jinsiyad-daada, diintaada, jihadaada galmada, naafonimadaada ama aqoonsigaaga jinsiga awgood

Marka lagu dulmiyo xaaladdaada sharciyeed awgeed waxay taasi tahay dembi neceybka ku salaysan ee cunsurnimo



DEMBIYADA NECEYBKA

**FOOMKA ISKAA UGA WARBIYIN**

[www.report-it.org.uk](http://www.report-it.org.uk)

TRUE VISION

# WIXII KU SAABSAN DHACDADA

Ma waxaad tahay dhibbanaha mise markhaati?

- Dhibbanaha  Markhaatiga  Qof Kale

Maxaad u malaynaysaa in ay tahay sababta dembigaas loo geystey?

- Naafonimada  Jinsiyadda  Diinta  
 Jihada galmada  Ukalagudubka jinsiyada

Afkaaga nooga sheeg dhacdada adigoo naga siinaya inta warbixin ah ee suurogal ah

(Ku sii wad xaashi gaar ah haddii aad u baahato)

Goormee ayay dhacdadu timid?

Saacadda  Maalinta  Taariikhda

Halkee ayay ka dhacday?

cinwaankaaga

- Haa (Fadlan faahfaahin ka bixi)  Maya

Miyay waxyeello gaartay hanti dhacdada awgeed?

- Haa (Fadlan faahfaahin ka bixi)  Maya

## WIXII DHIBBANAHA KU SAABSAN

Da'da  Jinsiga  Taariikhda   
Dhalashada

Luqadda hooyo

Si aad nooga caawiso in aannu si habboon wax uga qabanno dembiga neceybka ku salaysan, fadlan sax ku calaamadee waxa aad ku tilmaami lahayd dhibbanaha

### Diinta

- Buddhist  
 Kiristan  
 Hindu  
 Yuhuudi  
 Muslin  
 Rastafarian  
 Siig  
 Mid kale  
 Diin ma haysto  
 Ma rabo in uu sheego

### Jihada galmada

- Rag iyo dumarba u taga  
 Khaniis/Khaniisad  
 Si dabiici ah u galmooda  
 Ma rabo in uu sheego

### Jinsiyadda

- Caddaan Ingiriisi ah  
 Caddaan Ayrish ah  
 Asal kaloo caddaan ah  
 Caddaan iyo Madow Kaarabiyah ah  
 Caddaan iyo Madow Afrikaan ah  
 Caddaan iyo Aasiyan ah  
 Asal kaloo iskadhal ah  
 Hindi  
 Baakistaani  
 Bangladeshi  
 Madow Kaarabiyah ah  
 Madow Afrikaan ah  
 Asal kaloo Madow ah  
 Shiine  
 Midgo ama Wareegto  
 Roma ama Sinti  
 Koox kaloo jinsiyadeed  
 Ma rabo in uu sheego

Waddanka aad ku dhalatay

# WIXII KU SAABSAN DEMBIILAHA(LEYAASHA)

Imisa qof ayay dembiileyaashu ahaayeen?

Miyaad iyaga taqaannaa?

- Haa  Maya

Haddii ay haa tahay fadlan sheeg magaaddooda iyo cinwaannadooda haddii ay suurogal tahay

Miyaad sheegi kartaa sida ay u eeg yihiin?

(Ka fikir da'dooda, jinsigooda, dhererkooda, jinsiyadooda, dhumuca jirkooda iyo dharkooda).

Noo tilmaan sifooyinka ama calaamadaha kale ee ay leevihiin ee daruuriga ah

Miyay baabuur isticmaaleen?

Fadlan sheeg sida uu baabuurku u eekaa matalan midabkiisa, shirkadda samaysay, noociisa, lambarka birtiisa iyo sifooyinka kale